


SOMALI MEDICAL CHARITY

THYROID – Qanjirka qoorta

Mohamed Ibrahim, MD
Minneapolis, MN

Maxuu yahay:

Qanjirka qoorta ku yaala ee Englishka lagu yiraahdo **thyroid** waxaa uu ka mid yahay habdhiska hoormoonada (**endocrine system**). Waxaa uu ku yaalaa qoorta bartamahaada meesha ka hooseysa lafta carjowga raggu ka muuqato (**Adam's apple**). Waxaa uu leeyahay labo qaybood oo labada dhinac ee qoorta kaga taal (**two lobes**). Qanjirkan waa mid muhiim u ah jirka oo soo saara hoormoon (**thyroid hormone**). Hoormoonkiisa waxuu maamulaa dheef isticmaalka ama howl galka jirka (**metabolism**). Qanjirkan waxuu isticmaalaa cusbada loo yaqaan **Iodine** si uu u sameeyo hoormoonkiisa, la'aanteedna waaba howl-gabaa. Halkan ka eeg sawirkiisa.



Maxaa cuduradiisa ka mid ah:

Way badan yihiin waxaana ka mid ah infection, howl-gabid, howl-kordhin, iyo kansarka oo ku dhaca oo kuwo kala duwan ah. Tan ugu badan waa howl-gabid ama howl-kordhin oo ay keenaan waxyaabo kala duwan.

Howl-gabida (**hypothyroid**) inta badan waxaa keena iyadoo uu qanjirkan waayo cusbada Iodine-ka uu ku shaqeeyo. Dhulal badan oo aduunyada ka mid ah ayay ciidoodu ku yartahay Iodine-ka ka dibna dadku ku weynaadaa qanjirka taasoo loo yaqaan **Goiter**. Waxa kaloo howl-gabka ka imaan kartaa jir-kac ku dhaca qanjirka (**inflammation**) oo loo yaqaan **thyroiditis**.

Howl-kordhinta (**hyperthyroid**) waxaa ugu badan oo keena waa qanjirka qayb ka mid ah oo iskeed howlgal iska gasha (**hyperfunctioning nodule**). Waxaa kaloo jira cudur la yiraahdo **Graves' disease** oo isagana keena kaasoo lagu yaqaan in ay indhaha dadka banaanka kaga soo baxaan. Waxaa kaloo keeni kara jirka oo dagaal ku qaada qanjirka naftiisa (**auto-immune thyroiditis**).

Kansarka qanjirkan ku dhacaa waa dhowr balse kansarka ugu badan waa mid dhimashadiisa aysan badneyn dawayntiisana ay sahlan tahay. Dad baa yiraahda hadii uu kansar igu dhacayo Ilaahow kan iiga dhig!!

Maxaa lagu daweeeyaa:

Daweynta cudurada ku dhaca qanjirkan waxay ku xiran tahay nooca uu yahay. Midda howl-gabka waxaa lagu daweeeyaa si sahlan oo kaniini ayuu qofku si joogto ah u qaataa. Midda howl-kordhinta waxay ku xiran tahay waxa keenay. Qaarna qaliin ayaa lagu daaweeya qaarna kaniini ama daawo qaas ah oo lagu burburinayo qanjirka ayaa loo isticmaalaa. Dawayntiisa waxay ku xiran tahay qofka da'diisa, xaalkiisa, iyo wixii la mid ah.

Ogeysiis:

Casharkaas kor ku xusan looguma talagelin in lagu sheybaaro ama lagu daweeyo shaqsi. Fadlan la xiriir dhaqtarkaada hadii aad astaamahaa isku aragto.